

# Wargeyska Mountain View

## Nofembar 16, 2016

Talaado, Nofembar 22.....Waalidiinta iyo Macmacaanka, CLC marka ay tahay 8:30  
Arbaco, Nofembar 23.....Ma Jiro Dugsi, Nasashada Mahad Celinta (Thanksgiving Break)  
Qamiis, Nofembar 24.....Ma Jiro Dugsi, Nasashada Mahad Celinta (Thanksgiving Break)  
Jimco, Nofembar 25.....Ma Jiro Dugsi, Nasashada Mahad Celinta (Thanksgiving Break)

### Fariinta Agaasimaha

Waxaan ku jirnaa waqti aan waxba la hubin, waxaan rabaa in aan hubsado in qoysaskena iyo bulshada ogadaan in Mountain View ballan qaaday in ay dugsigena ka dhigto meel ammaan ah oo soo dhaweya dadka ka kala yimid dhamaan hiddaha, diinta, isirka, kartida iyo jinsiga qofka. Kala duwanaantena waa waxa na qurxiyo oo na xoojiyo. Mountain View waxay hiddo u leedahay in ay soo dhaweyso, jeclaato, iyo wax ka barato ardayda iyo qoysaska ka yimaada waddamada kala duwan, ku hadla luqadaha kala duwan, haysta diin iyo caqiidooyin kala duwan. Tani waxay hanti u ahayd dugsigena iyo bulshadana, fariinteenana waxay tahay ma aha oo keliya in dugsigena ku soo wanaagsanaaday, balse wanaagga wuxuu sidoo kale gaaray iyo wuxuu gaari doonaa magaaladana, gobolkeno, iyo waddankena. Ardaydena waxay mattalaan mustaqbal heer sare, ay kala duwanaantena u keeni doonto dunidena. Sii wada wanaagga. Sii wada in aad jeclaataan dadka kale. Sii wada rajada. Tani waa waqti wanaagsan oo lagu xasuusto in fikradena sannadkaan tahay in la raaco sharciga dahabiga. Waxay ii tahay wanaag in aan dhamaantiin idinla shaqeeyo. Waad ku mahadsan tahii sida aad ii dareen siiseen soo dhaweynta. Waxaan mar kasta samayn doonaa waxa ugu fiican si aan u habsado in qof kasta dareemo soo dhaweynta iyo ammaanka halkaan Mountain View.

### Geeska La-Talliyaha

Waalidiinta, fadlan nagu soo biira Parents iyo Pastries (Macmacaanka iyo Waalidiinta) bisha Nofembar 22 si aan u aqoonsano ardayda Mountain View ee loo arkay in ay muujiyeen xushmad bisha Oktoobar. Bil kasta waxaan wax ka baranaa iyo waxaan ku celcelinaa alsuubta dhismaha dabecadda iyo ardayda oo loo aqoonsado marka ay ku celceliyaan aasluubtaas. Bisha Nofembar, asluubta waa "madaniga." Booqo bogga la-tallinta si aad wax uga ogaatid asluubta iyo waxa ardaygaada barto.

<http://mvecounselor.weebly.com/mountain-views-super-power-traits.html>

### Waalidiinta iyo Macmacaanka

Agaasimeyaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qaban doono Waalidiinta iyo Agaasimeyaasha waxaa lagu qaban doonaa Community Learning Center (Xarunta Waxbarashada Bulshada) maalinta Talaadada, Nofembar 22, marka ay tahay 8:30. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.